

Dhammaan dadka ree Alberta ee 12 + jirka ah waxay xaq u leeyihiin tallaalka KOOFID-19

Maayo 05, 2021

Dhammaan dadka reer Alberta ay da'dooda ka weyntahay 12 waxay dhawaan xaq u yeelan doonaan tallaalka KOOFID-19 si ay naftooda u difaacaan una joojiyaan kor u kaca.

Ka dib markii ay tallaalka siisay reer Alberta kuwa ugu halista badan ee natiijoyinka daran lahaa, Alberta waxay hadda u gudubtay Wajiga 3, halkaas oo qof kasta oo ka weyn da'da 12 ay ballan ka dhigan karaan si ay u helaan qiyaasta ugu horreysa

Ballaarintaan, 3.8 milyan oo reer Alberta ayaa xaq u yeelan doonta tallaalka KOOFID-19.

Si looga fogaado nidaamyada ballansashada badan, ballamaha ayaa lagu kala bixi doonaa laba koox oo da' ahaan ah.

- Laga bilaabo Maayo 6, qof kasta oo reer Alberta ah 30 ama ka weyn (dhashay 1991 ama wixii ka horreeyay), wuxuu ballan ka qabsansan karaa Adeegyada Caafimaadka ee Alberta ama farmashiyaha ka qayb qaadanaya.
- Maayo 10, ballansashada waa la ballaarin doonaa waxaana ku jiri doona reer Alberta oo da'doodu tahay 12 illaa 29 (oo dhashay 2009 ilaa 1992).

In kabadan 1.66 milyan oo qaadasho oo tallaalka ah ayaa hadda laga bixiyay gobolka oo dhan. Dhammaan ballamaha tallaalka waxay sii wadi doonaan inay ku tiirsanaadaan keenista soo socota ee Alberta.

Dhammaan dadka u qalma ee reer Alberta waxay awood u yeelan doonaan inay qabsadaan ballamo si ay u helaan tallaalka mRNA ee Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) khadka tooska ah ama 811.

Dadka Alberta sidoo kale waxay ballansan karaan tallaalkadan iyagoo u maraya farmasiyada ka qayb qaadanaya. Si aad u hesho meesha kuugu dhow adiga oo leh taariikhda ballansashada ugu horreysa, hubi liistada Alberta Buluu Koross ([Alberta Blue Cross](#)).

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa ka hortagga faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nololaha iyo habnololeedka iyada oo tillaabooyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaad ee Alberta.

Xogta la xiriirta

- Qabso ballanta tallaalkaaga ee KOOFID-19

Weydiimaha warbaahinta

Tom McMillan

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.